

Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu bilaabay raadinta Guddoomiyaha Waxbarashada xiga maadaama Guddoomiyihii hore shaqada ka tagay. Doorashada guddoomiye waxbarasho oo cusubi waa mid ka mid ah go'aanada ugu muhiimsan ee golaha waxbarashadu qaado. Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland waxaa ka go'an raadinta hoggaamiyaha saxda ah ee bulshadeena ardaydoodu, shaqalaahoda, qoysaskoodu, iyo bulshaduba.

Haddaba in la shaqaaleysiyo hoggaamiyaha xiga ee saxda ah degmadeena waa go'aan muhiim ah, Golaha Waxbarashadu wuxuu mudnaanta siinayaan ka qeybgalka bulshada si loo wargaliyo raadinta. Goluhu wuxuu doortay [Human Capital Enterprises](#) inay u fudeydiyaan qoritaanka iyo habka xulashada iyada oo la higsanayo inuu guddoomiyaha waxbarashada ee cusub shaqadiisa bilaabo luulyo 1deeda, 2024.

Habka raadinta wuxuu socon doonaa sida isku xigta ee soo socota:

1. **Qorsheynta** (Waa la dhammeystiray): Shirkadii qofka la rabo raadineysay, waa la dhammeystiray waqtiga raadinta, iyo ku dhaqanka soo jeedinta habka raadinta iyada oo si joogta ah bulshada lagu wargalinay wixii cusub.
2. **Ka qeybgalka Bulshada Deegaanka** (Maarso 7th - 22nd): Wajigani wuxuu xudun u yahay ka qeybgalka ardayda, shaqaalaha, qoysaska, iyo xubnaha bulshada. Goluhu waxay sameyn doonaan sahan dhinaca online-ka ah iyo koox ka badan 50 diirada saaraya. Goluhu wuxuu isticmaali doonaa warcelinta iyaga oo sii horumarinaya shuruudaha lagu shaqaaleysiinayo iyo doorashadooda guddoomiyaha xiga.
3. **Shaqaaaleysiinta** (Maarso 15th - April 19th): Human Capital Enterprises waxay xayaysiin doonaan iyaga oo shaqaaleysiin doona heer qaran musharaxiinta buuxiya shuruudaha la ansixiyey inuu noqdo Guddoomiyaha Xiga inuu haysto shahaadooyinka iyo khibrada laga qabto.
4. **Doorashada** (Abriil 24th - June 1st): Wajigani waxaa ku jira kara hawlaha inay ka qeybqaataan ardayda, shaqaalaha, qoysaska, iyo xubnaha bulshada; wareysiyada Golaha; iyo baaritaan dhammeystiran oo Guddoomiyaha la dooranayo noloshiisa baaritaan lagu sameynayo .
5. **Waqtiga Kala Guurka ah**: Waxaan rajeyneynaa inaan u soo bandhigno guddoomiye cusub dhammaan bulshadeena dugsiyada. Inkastoo guddoomiyaha cusub uuna shaqadiisa si ramsi ah u bilaabi doonin Luulyo 1deeda, 2024, waxaan ku talogalnay inuu hawlihiisa bilaabo waxyar ka dib marka la doorto, oo ay ka mid tahay fursadaha "kulanka-salaanta" ee bulshada oo dhan uu kula kulmayo.

Maalmaha soo socda waxaad fili kartaan inaad hesho linkiga Sahanka Raadinta Guddoomiyaha Waxbarashada. Inta lagu gudo jiro waqtigaasi ***waxaan rabnaa inaan warkaaga maqalno***. Waxaan rabnaa inaan ogaano waxa aad ku qiimeyneyso waqtigaaga ku saabsan Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxa uu yahay caqabadaha uu la kulmi doono guddoomiyaha cusubi, iyo tayooyinka aa rabto inuu yeesho hoggaamiyaheena cusubi. Waxaan rajeynaynaa inaad waqti qaadan doonto ku dhammeystirto sahanka adiga oo la wadaagaya saaxiibadaa, qoysaskaaga, iyo dariskaagaba.

Waxaan sameynay [bog gaar u ah shabakadayadda](#) halkaasi oo aan ku soo qori doono wixii horumar cusub ee laga sameeyey, su'aalaha inta badan la isweydiiyo, iyo jawdalka habkeenu uu raacayo. Haddii aad hayso wax su'aalo ah kuna saabsan habka, waxaan kugu soo dhaweyneynaa inaad nagala soo xidhiidho halkan [SuperintendentSearch@pps.net](mailto:SuperintendentSearch@pps.net).



The Portland Public Schools Board of Directors has launched their search for the district's next superintendent.

The Board has selected Human Capital Enterprises to facilitate a comprehensive recruitment and selection process with the goal of hiring the next superintendent to begin July 1, 2024.

Because hiring the right next leader for our district is a critical decision, the Board is prioritizing community engagement to inform the search. We have established a dedicated page on our website where we have been posting regular progress updates, frequently asked questions, and a timeline of our process.

We invite you to learn more and to follow along at [www.pps.net/supsearch](http://www.pps.net/supsearch).